

JANUARY 25, 2012

## Shaqaalihii gargaarka ee afduubnaa oo lagu bad baadiyey Soomaaliya

**Maanta, waxa la badbaadiyey Jessica Buchanan iyo poul Hagen Thisted markii lagu guda jiray hawlga ay ka fuliyeen Mareykanka Soomaaliya. . Labadan shaqaale ee qeybta miino baarista ee hay'ada qaxoontiyada ee Dheenishka ayaa bad qaba oo iminkana ku sugan meel nabad ah.**

Ka dib sadex bilood oo ay ku afduubnaayeen Jessica Buchanan oo Mareykan ah iyo Poul Hagen Thisted oo Dheenish ah ayaa maanta si guul ah looga soo badbaadiyey afduubayaashii ku heystay Soomaaliya

“Waxaan ku farax sanahay oo aan ku diirsaday in aan ogaado in murugadii Poul iyo Jessica ay dhamaatay. Labadooduba wey bad qabaan waxaana la la mideyn doonaa qoysaskoodii. Iminka Poul iyo Jessica waxay u baahan yihin wakhti iyo xaq dhawr arimahooda oo ay kaga soo kabtaan sadex da bilood ee ay ku sugnaayeen dhibaata ay soo mareen” Waxa sidaas tiri madaxa qeybta caalamiga ee DRC.

“Waxa aan la xiriiray qoysaskoodii, kuwaas oo dabcan aad ugu diirsaday faraxsana. Waxay na weydiisteen in aan saxaafada u mahad celino sida ay noo dhowreen iyo xishmada ay siiyeen xogta iyo dhawrsanaata qoysaskooda. Waxa ay ku rajo weyn yihiin in tani ay sii socon doonto, iyagoo ku dhiiri galinaya suxufiyiinta in ay tix galiyaan xaaldooda. Qoysasku waxay nagu soo hagayaa wixii saxaafad la xishiisha” waxaa sidaas tishi Ann Marry Olsen.

Labadan shaqaale ee gargaarka ka shaqeeya qeybta miino barista ee marka la so gaabiyo loo yaqaan DDG ee hay'ada qaxoontiyada ee Dheenishka waxaa laga afduubay Magaalada Gaalkacyo ee badhtamaha Soomaaliya 25kii Octoobar 2011.

“Hay'ada qaxoontiyada ee Dheeniska waxaa loo sheegay in ay suurtoagal noqon karto hawgalkan lagu bad baadinayo, hase yeeshee marnaba ma aysan ogeyn sida uu udhacayo iyo goorta uu dhacayo. Waxaan se hubaal u oganahay oo anagana muhiim noo ah in Poul iyo Jessica ay madax xoryihiin. Waxaanu mahad u cekineynaa cidii soo afjartay mashaqadan iyo falalkan dambiyada ah ee loo geystay Jessica iyo Poul,” waxaa sidaas tidhi Ann Marry.

Ilaa iyo 25kii Oktoobar 2011, markii ay la afduubay Jessica Buchanan oo 32 jir ah iyo Poul Hagen Thisted oo 60 jir ay, hay'ada qaxoontiyada ee Dheenishka waxa ay ka heshay taageero gaar ah hogaamiye yaal dhaqan oo wax ku ool ah, siyaasiyiin Soomaali ah halka bulshada rayidka ahi ay tuseen tageero culus iyagoo ku dalbaday mudaharaadyo ka dhacay jidadka in la sii daayo Poul iyo Jessica.

For further information pls contact:

Communications Team Co-ordinator Iben de Neergaard - +45 3373 5180 / +45 2031 6687 or communications officer

Villads Zahle - +45 3373 5184 / +45 2642 1007

[www.drc.dk](http://www.drc.dk)

“Bulsha rayodka ah ee Soomaalida waxay ay cambaareeyeen afduubkan oo ay isla markaana sii laban laabeen cadaadiska ay ay saareen dambiilayaasha ka dambeeya afduubkan. Waxa nalooga soo hambalyeeye bulshada Soomaaliyeed qeybaheeda kala duwan, waxaana nalo sheegay in damaanshaad kadhacay caasimada Muqdishu, Gaalkacyo iyo Cadaado- halkaas oo bulshada degan ay aad isu deydey in ay caawiyaan Poul iyo Jessica. Dadaalkoodii muu qasaarin, in kastoo ugu dambeystii halw gal badbaado ay noqotay mid lagama maarmaan ah,” waxaa sidaas tidhi Ann Mary Olsen.

Jessica Buchanan oo 32 jir ah waxa ay kala shaqeenaysay in ay kalataliso xaga waxbarashada ee gobolkan qeybta miino barista ee DRC ilaa bishii May 2010. Poul Hagen Thisted oo 60 jir ahna waxa uu u shaqeenaya maamule xaga badbaadinta bulshada oo kala shaqeenayey DRC iyo DDG Soomaaliland iyo Soomaaliyaba ilaa bishii Juun 2009.

Hay'ada qaxoontiyada ee Dheenisha waxa ay Soomaaliya ka shaqeyneysay ilaa 1998, waana hay'ad si weyn looga ictiraafsanyahay mandaqada gobolkan. Maanta, waxa ay hay'adanu gaadhsiisaa gargaar ilaa 450,000 oo qof oo ku dhaqan Bariga Africa iyo Yemen, halkaas oo ah gobol ay ku adagtahy inta badan in ay gaadhaan hey'adah gargaarka ah- taas oo ay sababeen tobanaan sano oo iska horimaadyo hubeysan iyo awoodo kala duban oo qalafsan.

Waxay DRC saxaafada ku dhiiri galineysaa in ay xaq dhawraan xaquuqda warka ee labada shaqaale iyo qoysaskoodaba. Wixii su'aalo ah eek u saabsan saxaafada waxaa lagala xidhiidhi karaa Kobanheegan, Denmaarik.

For further information pls contact:

Communications Team Co-ordinator Iben de Neergaard - +45 3373 5180 / +45 2031 6687 or communications officer

Villads Zahle - +45 3373 5184 / +45 2642 1007

[www.drc.dk](http://www.drc.dk)